

A photograph of two women standing in the rain. The woman on the left is older, with short grey hair, wearing a white jacket over a dark top, and holding a transparent umbrella. The woman on the right is younger, with dark hair, wearing a blue denim jacket over a blue top. They are both looking towards the right. Rain is falling heavily around them, creating a soft, blurred background of green foliage.

Qofka diyaargarobay si aad u wanaagsan ayuu wax u qabanayaa

Hagistaan ama tilmaanbixintaan aasaasiga ah waxaad ka heleysaa sidii aad ugu diyaargarooobi lahayd xaaladaha dhibaatooyinka iyo xiisadaha kala duwan ay jiraan, iyo sidii aad wax u qaban lahayd.

Tusmada qoraalka

- 2 Ma taqaannaa sidii aad ugu diyaargarooobi lahayd xaaladaha dhibaatooyinka iyo xiisadaha kala duwan ay jiraan, iyo sidii aad wax u qaban lahayd?
- 2 Diyaargarowga waxaa loo sameyn karaa siyaabo badan
- 3 Keydka guriga waa aasaaska diyaargarowga
- 4 Sidaan soo socota samee, haddii wax uun xaalad aan caadi ahayn ay dhacdo:
- 5 Sidee ayay xaaladaha dhibaata ah saamayn ugu yeelanayaan howlaha nololmaalmeedka?
- 7 Sidee looga digaa khataraha?
- 8 Baro xirfadaha lagammamaarmaanka ah, oo adiga iyo dadka kale si wadajir ah arrimaha u sameeya

Ma taqaannaa sidii aad ugu diyaargarooobi lahayd xaaladaha dhibaatooyinka iyo xiisadaha kala duwan ay jiraan, iyo sidii aad wax u qaban lahayd?

Diyaargarowga ama ku talaggalka waxaa loola jeedaa in qofku hore isugu diyaariyo xaaladaha dhibaatooyinka iyo xiisaduhu ay jiraan, iyo sidoo kale xaaladaha aan caadiga ahayn.

Xaaladaha kala duwan ee u baahan diyaargarowga ama ku talaggalka waxaa ka mid ah tusaale ahaan:



korontada iyo biyaha oo muddo dheer go'naada



Cillado farsamo oo muddo dheer ka jira dhanka shaqada xiriirka internetka iyo telefoonnada



ifafaalayaasha dabeecadda, sida duufaanta iyo fatahaadda



Xaalad u baahan in qofku gudaha isku ilaaliyo oo gabbaad ka dhigto, maaddo ama walax khatar ah oo jirta awgeed



Dhibaato socota muddo aad u dheer, sida cudurrada safmarka ah

Haddii dhibaatooyin kuwaas ka mid ah ay dhacaan, waxaa ay saamayn ku yeelanayaan arrimaha nololmaalmeedka ee caadiga ah. Si kastaba xaaladaha dhibaataada ama degdegga ah ma ahan kuwo lagu yaqaan dalkaan Finland. Xaaladaha aan caadiga ahayn waa loo diyaargarooobaa, inkasta oo in halistaas ay dhacdo ay tahay arrin dhif ah.

Marka ay dhacaan wax aan caadi ahayn, hawladeennada dowladda iyo hay'adaha kale ee mas'uulka ah ayaa xaaladda gacanta ku dhigaaya oo ka taxaddaraaya wax ka qabashadeeda. Laakiin, hawladeennadu ma awoodaan in ay keligood wax qabtaan. Diyaargarowga iyo ficilka qof walba u gaarka ah ee uu sameeyo waa arrin aad u muhiim ah.

Diyaargarowga waxaa loo sameyn karaa siyaabo badan

Qof kasta wuu diyaargarooobi karaa, xittaa haddii meesha wax laga bilaabaayo lagu kala duwan yahay. Ka feker sida aad naftaada uga dhigi karto mid u diyaarsan si wanaagsan, taasoo aad uga gudbi karto xaaladaha aan caadiga ahayn.

Diyaargarowgu waa

- **Keydka guriga** oo ah ugu yaraan muddo 3 maalmood iyo 3 habeen ah
- **Xirfadda waxqabadka**, oo aad isticmaasho marka ay ku soo waajahdo xaalad aan caadi ahayn
- **Awoodda waxqabad** ee jir ahaaneed iyo midda maskax ahaaneedba.
- **isku-duubnida bulshada** oo loola jeedo kalsoonida la xiriirka dadka kale, iyo sidoo kale awooddaada ah inaad wax caawiso.

Diyaargarowgu ma ahan in aad aaminsan tahay in wax xun ay dhici doonaan. Waa suurtaggal in xittaa waxyaabaha dhifka ah ee xaqiiqda ka fog ay marmar dhici karaan.

Keydka guriga waa aasaaska diyaargarowga

Keydka guriga waxaa loola jeedaa, in guriga uu kuu yaallo raashin, biyo iyo qalabka kale ee lagammamaarmaanka ah, ugu yaraan wax kugu filan 3 maalmood iyo 3 habeen.

Marka laga hadlaayo keydka guriga, dadku waa ku kala duwan yihiin. U diyaargarow sida xaaladdaada ku habboon. Hubi in keydka guriga uu ku filan yahay dhammaan dadka kugula nool gurigaaga.

Liiska hubinta ee keydka guriga:



Cunto sideeda lagu cuni karo (oo aan karis u baahnayn)



Weelal ama maacuun nadiif ah oo dabool leh oo biyaha lagu keydiyo



Biyaha la cabbo ugu yaraan 2 litir qof kasta, maalin walba



Shukumaannada qoyan (kosteuspyyhe) iyo jeermisdilaha gacmaha, aalkolada gacmaha



Dawooyinka lagammamaarmaanka ah



Qaddar yar oo lacag caddaan ama kaash ah



Raadiye batari ku shaqeeya, ama aan u baahnayn koronto



Kiniiniga aayodhiin (joditabletti), kaasoo sida la soo jeediyay loo qaadanaayo



Toosh ama karbuuno batari ku shaqeysa, ama aan u baahnayn koronto



Sharootada (Ilmastointiteippi) lagu daboolo meelaha hawo qaboojiyayaasha guriga



Batariyo iyo kadyka korontada ee batariyada la buuxiyo



Sidaan soo socota samee, haddii wax uun xaalad aan caadi ahayn ay dhacdo:

Dhibaato kasta oo degdeg ku dhacda ama xiisad walba oo timaadda, mid waliba tan kale waa ay ka duwan tahay.

Xaaladaha badankood si wanaagsan ayaad uga bixi kartaa, haddii aad samayso sidan soo socota:

- isdeji, oo mar walba xusuusnow inaad degganaato oo aadan khalkhalin.
- Ka feker, xaalad noocaa ah ayaa taagan, iyo sidoo kale wixii hagista waxqabadka ah ee aad garanayso ee xaaladdaas la xiriirta, sidoo kale ka feker qaabkeed ayay xaaladdaasi u saamaynaysaa adiga, qaraabadaada iyo dadka adiga kugu hareereysan.
- La soco farriimaha hawladeennada, una hoggaansan hagista ama tilmaanbixinnada lagu siinaayo.
- Samee liiska hawlaha muhiimka ah ee xaaladdaas taagan ku saabsan ee loo baahan yahay in la sameeyo, kuna dhaqaaq oo bilow wax ka qabashada hawlahaas.
- Caawi dadka kale intii awooddaada ah, islamarkaana codso haddii aad adiga nafsad ahaantaada u baahato caawimaad.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad lagu kalsoonaan karo bogagga internetka ee hay'adaha dowladda, iyo idaacadda ama raadiyaha YLE.

Ha la keli noqon ama adiga keligaa ha isku koobin, haddii ay xaalad adag kula soo gudboonaato. Kala hadal xaaladda dadka kugu dhow ama deriskaaga ah. Haddii aad u baahato, waxaad caawimaad ka raadsataa adeegyada caawimaadda ee degmada ama ururrada.

Haddii aad u baahan tahay caawimaad degdeg ah, wac lambarka xaaladaha degdegga ama emerjensiga ee 112. Xaaladda degdegga ah waxaa loola jeedaa tusaale ahaan dab kacay, dhaawac qof soo gaaray, ama xaalad kale oo degdeg ah oo aad u baahan tahay caawimaadda degdegga ah ee dabdamiska, ambalaasta ama booliska.



Sidee ayay xaaladaha dhibaataada ah saamayn ugu yeelanayaan howlaha nololmaalmeedka?

Xaaladaha dhibaatooyinka ah waxaa ay sababi karaan culeyso kala duwan. Hawlaha nololmaalmeedka ee caadiga ah waxaa ay isu beddeli karaan kuwo adag oo dhibaato leh, gaar ahaan marka ay xaaladdu qaadato muddo aad u dheer.

Ka feker sidii aad diyaargarowgaaga u wanaajin lahayd, adigoo kaashanaaya su'aalaha hoos ku xusan.

Keydka guriga:

Sidee ugu noolaan kartaa cuntada guriga taalla, haddii aanu jirin wax dukaan ah oo la aado?

U diyaargarow sidaan soo socota:

- U soo iibso keyd guri ahaan, cunto si toos ah loo cuni karo ugu yaraan saddex maalmood.
- Ka feker, qaababka aad u diyaarsan karto cuntada aad haysato, haddii korontadu ay go'an tahay.

Sidee ku noolaan kartaa haddii biyuhu ay maqnaadaan muddo dhowr maalmood ah?

U diyaargarow sidaan soo socota:

- Waa in ay guriga kuu yaallaan dhalooyinka biyaha: ugu yaraan 2 litir qof kasta oo gurigaaga jooga muddo saddex maalmood ah.

Helitaanka macluumaadka:

Sidee ku heli kartaa macluumaad haddii internetka iyo telefoonka ay go'aanaadaan muddo dheer?

U diyaargarow sidaan soo socota:

- Horay uga sii feker, qofkee ama meesha kuu dhow ee aad weydiin karto macluumaadka dheeraadka ah?
- Soo iibso raadiyo ku shaqeeya batari. Ogaysiisyada ku saabsan xaaladaha dhibaataada ay jirto waxaa laga sii daayaa raadiyaha ama idaacadda YLE.

Ku noolaanshaha guriga:

Sidee guriga ugu noolaan kartaa, haddii kuleylka guriga uusan shaqaynaynin oo gurigu qaboow noqdo?

U diyaargarow sidaan soo socota:

- Ka feker hal meel oo ka mid ah gurigaaga oo kulaylkeeda ama diirrimaadkeeda aad muddo dheer sii haysan karto.
- Joog halkaas meel oo keliya.
- Waxaad kaydsataa bustayaal diirrimaad leh.

Sidee guriga u iftiimin kartaa haddii korontadu muddo dheer go'do?

U diyaargarow sidaan soo socota:

- Soo iibso tooshka ama karbuunada caadiga ah ama tooshka madaxa lagu xirto.
- Waa in ay guriga kuu yaallaan batariyo ku habboon tooshka.

Maxaa kaa caawin lahaa inaad awooddo in aad xaaladda la qabsato oo aad si wanaagsan uga gudubto, sidee ayaadse niyad wanaagsan ugu sii hayn kartaa xaaladda adag?

U diyaargarow sidaan soo socota:

- Ka feker, waxyaabaha aad qaban karto si aad u ilaaliso niyad wanaagga? soo iibso oo guriga ha kuu yaallaan tusaale ahaan ciyaaro, buugaag, waraaqo iyo qalimaan.
- ka feker, maxay ahaayeen qaababkii wanaagsanaa ee hadda ka hor kuu fududeeyay inaad ka gudubto xaaladihii dhibaataada ee hore. tusaale ahaan taageerada dadka kale waxay kaa caawisaa sidii aad ula dhaqmi lahayd xaaladaha aan caadiga ahayn.

Ma ogaatay arrimo aad ku wanaajin karto diyaargarowgaaga? Waxaad hadda qaadday talaabo muhiim ah oo aad ugu diyaargarowdo sidii ugu wanaagsaneyd!

Sidee looga digaa khataraha?

Marka ay dhacdo xaalad dhib ah ama uu shil dhaco, hawladeennada iyo mas'uuliyiintu waxay bixiyaan hagiis ama tilmaanbixin ku saabsan sida aad wax u qaban lahayd. Shilalka iyo xaaladaha khatarta ah badankooda waxaa marka ugu horreeya ka hadla oo wax ka sheega wakaaladda badbaadada (pelastuslaitos) ee dagaanka aad ku nooshahay.

Khatarta degdegga ah ee ka jirta dibadda ayaa laga digaa, iyadoo la isticmaalaayo sheegista wargelinta khatarta ah iyo astaamaha khatarta ee guud. Sababta digniinta ama wargelinta waxay noqon kartaa, tusaale ahaan, qiiq ka dhashay dab, duufaana ama xaalad kale oo khatar ah.



Digniinta ama wargelinta khatarta:

Digniinta ama wargelinta khatarta waxaa laga baahiyaa ama laga sheegaa idaacadaha, haddii loo baahdana waxaa lagu soo bandhigaa telefishinka.

Waxaa halkaas laga sheegaa waxa dhacay, waxaana la isa siiyaa hagiis ama tilmaanbixin ku saabsan sidii khatartaas la isaga ilaalin lahaa.

Samee sida ay tahay hagista ama tilmaanbixinta macluumaadka lagu siiyay.

Telefoonkaaga waxaad ku soo degsataa ablikeeshinka 112 Suomi. Macluumaadka ku saabsan khataraha ka dhaca agagaarka aad ku nooshahay waxaad si toos ah uga heleysaa telefoonkaaga, haddii aad oggolaato in ogeysiisyada ama wargelinnada lagama maarmaanka ah lagu soo diri karo.



Astaanta khatarta:

Khatarta waxaa looga digaa qaab ah astaanta cod dheer oo hal daqiiqo kor u kacaaya iyo mid hoos u soo dhacaaya.

Marka aad maqasho astaanta khatarta, waa in aad gudaha gashaa.

Waxaad macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan xaaladda ka heleysaa digniinaha ama wargelinta xaaladda khatarta ah. Raac oo ku dhaqan hagista ama tilmaanbixinta ay mas'uuliyiintu bixinayaan.

Astaanta khatarta waxaa lagu tijaabiyaa hal astaan codeed gaaban bil kasta maalinta isniinta ah ee ugu horraysa saacadda 12:00. Markaa adiga lagaagama baahna inaad wax samayso, arrinku waa tijaabo oo keliya, ee ma ahan in khatar ay jirto.

Sidaan soo socota ayaad gudaha isugu ilaalin kartaa oo gabbaad uga dhigan kartaa:

Marka khatar dhacdo, ficilka ugu badan ee la sameeyo waa in gudaha la galo si la isugu ilaaliyo oo gabbaad looga dhigo. Waxaa gudaha la galaa tusaale ahaan marka ay hawada ku faafayaan qiiq waxyeello leh. Mas'uuliyiinta ayaa kuugu sheegaaya digniinta ama wargelinta khatarta ah, haddii loo baahan yahay in gudaha la galo.

Sidaan soo socota samee, marka lagu sheego in aad gudaha gabbaad ahaan u gasho:

- Gudaha gal.
- Jooji ama istaaji nidaamka hawo-beddelka (ilmanvaihto) guriga. Si fiican u xir albaabada, daaqadaha iyo godadka hawo-beddelka guriga.
- La soco wargelinta ama digniinaha khatarta ee ay bixinayaan hawladeennada iyo mas'uuliyiinta, oo samee sida hagista ama tilmaanbixinta laguugu sheegay.
- Joog oo gudaha gabbaad ka dhigo, illaa iyo inta ay mas'uuliyiintu ka sheegayaan in xaaladdii degdegga ahayd ay dhammaatay.

Baro xirfadaha lagammamaarmaanka ah, oo adiga iyo dadka kale si wadajir ah arrimaha u sameeya

Ka qaybqaado

Waa arrin aad muhiim u ah in arrimaha la isla qabto dadka kale, iyo in dadka kale la caawiyo. Waxaad tusaale ahaan ka qaybqaadan kartaa hawlaha ay qabanqaabiyaan ururrada, ama waxaad noqon kartaa qof si ikhtiyaarkiisa ah wax u qabta. Isku-duubnida bulshada waxay kaa caawinaysaa inaad awood u yeelato inaad si wanaagsan wax u qabato, marka ay dhacdo xaalad aan caadi ahayn.

Finland waxaa ka jira ururro badan, sida naadiyada isboortiga, ururrada dhaqanka, iyo naadiyada saaxiibtinimada. Macluumaad luqado kala duwan ku qoran oo ku saabsan ururrada iyo shaqooyinka ikhtiyaariga ama iskaa wax u qabsada ah ee ay qabtaan, ayaad ka heli kartaa bogga internetka ee InfoFinland.

Baro

Marka ay dhacaan xaaladaha dhibaataada iyo degdegga leh, waa in la bartaa wax badan oo ku saabsan qaabkii loogu diyaargarooobi lahaa xaaladahaas. Waa arrin aad u wanaagsan in aad barato xirfadaha gargaarka degdegga ah.


Tababbarro dadkoo dhan u furan oo ku saabsan diyaargarowga iyo xirfadaha badbaadada ayaa waxaa qqbanqaabiya, tusaale ahaan ururka Maanpuolustuskoulutusyhdistys (Ururka tababbarka difaaca qaranka) MPK: mpk.fi

Koorsooyinka gargaarka degdegga ah waxaa diyaariya ururka laanqayrta cas ee Finland (Suomen Punainen Risti): spr.fi

Qoraalkaan kooban ee buugga ayar ah waxaa loo sameeyey si uu kaaga caawiyo inaad si wanaagsan ugu diyaargarowdo, xaaladaha aanay hawlihii nololmaalmeedka ahaa u soconaynin sidii caadiga ahayd. Waxaan rajeynayaa in uu kaa caawiyo ogaanshaha, arrimaha aad adiga dhanka diyaargarowgaaga si wanaagsan u samaysay, iyo arrimaha aad dooneyso inaad hagaajiso.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaaladaha dhibaataada iyo degdegga ah ee ku qoran af-finish, af-iswidish, iyo af-ingiriisi waxaad ka heleysaa hagaha Suomi.fi ee bogga internetka ee cinwaankiisu yahay: suomi.fi/varautuminen.

Waxaad sidoo kale qoraalkaan kooban ee buugga ka heleysaa hagaha boggaas internetka, isagoo ku qoran luqado kale.



arabia | somali | dari | farsi | venäjä | ukraina | sorani | pohjoissaame | inarinsaame | koltansaame | selkosuomi | selkoruotsi | englanti | ruotsi | suomi

Buugyarahaan hagaha ah waxaa soo saartay wasaaradda arrimaha gudaha, iyadoo la kaashanaysa xarunta xafiiska dhijitaalka iyo diiwaangelinta dadweynaha, iyo sidoo kale hay'adaha iyo ururrada qaabilsan diyaargarowga iyo waxqabadayada u diyaarsanaanta xaaladaha degdegga ah.

Sannadka daabacaadda 2024